DANSK FLYGTNINGE HJÆLP

Somali

# Xog la xiriirta sharciga cusub oo loogu talo galay qaxootiga ku nool Denmark

JUUN 2019

Bishii febaraayo ee 2019 waxaa baarlamaanka Deenishku ansixiyey sharci cusub oo la xiriira qaxootiga iyo is dhexgalka (integration). Sharcigan la meel mariyey ayaa walaac ku abuuray dadka qaxootiga ah ee ku nool Denmark. Buugan yari wuxuu si kooban uga hadlayaa qaybaha ugu muhiimsan ee isbedelka lagu sameeyey iyo saamaynta ay ku yeelan doonto xuquuqda qaxootiga ku nool Denmark. Bogga u dambeeya buugan waxaad ka akhrin kartaa halkii aad ka heli lahayd faahfaahin iyo talo bixin dheeraad ah.

Sharciga cusub ee lambarkiisu yahay 174 ayaa dhaqan galay 1dii Maarso ee 2019, laakiin qaybo ka mid ah sharciga ayaa dhaqan gelaya waqtiyada soo socda.

Ka dib doorashadii barlamaanka, waxaa 25. juun 2019 siyaasiyan loogu heshiiyay in xukuumad cusub la sameeyo. Arimaha lagu heshiiyay waxaa ka mid ah, sida ku qeexan buugan yar. Qawaaniinta lagu heshiiyay in lagu bedelo heshiiskan, weli baarlamaanka lama hordhigin, oo ma ansixinin. Qawaaniinta shaqaynaysa hadda, waa sidan hoos ku qoran:
Waxaan rajaynaynaa inuu isbedel ku dhaco qaybahan hoose:

1. Hoos u dhigida lacagta isdhexgalka ee dadka 3 sanno deganaa Deenmaark, taas oo hirgalaysa 1.janaayo 2020 in la joojiyo.
2. In loo bilaabo si ku meel gaar ah lacagta caruurta, qoysaska uu qabtay xeerka lacag dhimida isdhexgalka iyo caydha.
3. Qaxootiga haysta deganaashaha ku salaysan sharciga qoxootiga ee § 7, stk. 3 (magangalyada ku meel gaarka ah) iyo qoysaska la keenay inay xaq u yeeshaan in laga bixiyo waxbarashada sare sida dadka kale.
4. Qaxootiga haysta deganaanshaha ku meelgaarka ah, ee ka shaqaynayay Deenmaark 2 sanno, waa inay xaq u yeeshaan inay sii deganaadaan Deenmaark, haddii ay weli ka shaqaynayaan isla shaqadii.

Qawaaniinta shaqaynaysa waa sidan:

## Deganaanshaha ku meelgaarka ah iyo deganaanshaha abadiyanka ah.

Wixii ka horeeyey sharciga cusub qaxootiga waxaa la siin jiray deganaansho ku meelgaar ah, muddo ka dibna waxay codsan jireen deganaanshaha abadiyanka ah.

Ka hor inta aan sharcigan cusub dhaqan gelin, qaxootiga la siiyo deganaashaha ku meelgaarka ah ee lamarkiisu yahay §7, stk. 3 ayaa la siin jiray si ku meelgaar keliya ah. Halka qaxootiga la siiyo deganaansha ku meelgaarka ah ee lambarkiisu yahay §7, stk.1 iyo §7, stk. 2 ay fursad u haysan jireen inay si rasmi ah u deganaan karaan dalka. Laakiin shacriga cusub markuu dhaqan galay ka dib, dhammaan deganaanshaha la siiyo qaxootigu waxaa lagu bixin doonaa si kumeelgaar ah keliya. Laga bilaabo 1da luulyo 2019 waxaa sidoo kale ku meelgaar keliya noqon doona dhammaan deganaanshaha aan abadiyanka ahayn ee horay loo siiyey dadka qaxootiga ee ku nool Denmark. Is bedelkan lagu sameeyey deganaanshaha ku meelgaarka ah saamayn degdeg ah kuma yeelan doono xuquuqda dadka qaxootiga ah. Sharciga cusub ma saamayn doono dadka haysta deganaanshaha abadiyanka ah.



Wax is bedel ah kuma dhicin fursaddii ay dadka qaxootiga ah u haysteen inay ku dalbadaan deganaanshaha abadiyanka ah. Abadiyanka weli waa la dalban karaa marka qofku dalka deganyahay 8 sano isla markaasna uu buuxiyo shuruudaha kale ee looga baahanyahay qofka codsanaya deganaanshaha abadiyanka. Sidoo kale dadkii horay loo siiyey deganaanshaha abadiyanka ayaa sii haysan doonaan deganaanshahooda.

Sidoo kale wax is bedel ah kuma dhicin fursada ah in qofku heli karo dhalashada ama jinsiyadda daanishka. Qofka qaxootiga weli wuu dalban karaa jinsiyadda daanishka marka uu dalka deganayahay 8 sano, isla markaasna uu buuxiyo shuruudaha laga doonayo qofka dalbanaya jinsiyadda sida luqadda iyo shaqada.

## Cusboonaysiinta iyo kala noqoshada deganaashaha

Wixii hadda ka horeey waxaa inta badan si toos ah deganaanshaha loogu cusboonaysiin jiray qaxootiga haysta deganaanshaha ku meelgaarka ah. Laakiin hadda wixii ka dambeeya waxaa xoogga la saari doonaa inaan la cusboonaysiin deganaanshaha ama in lagala noqdo haddii loo arko inay meesha ka baxday baahidii qofku u qabay magangelyada. Taas oo macnaheedu yahay in si gaar ah loo qiimayn doono qofka qaxootiga ah si loo ogaado in qofku weli khatar kala kulmi karo dalkiisii iyo in kale. Marka qofka lagala noqonayo deganaanshaha ama loo diidayo in loo cusboonaysiiyo waxaa qiimayn lagu samayn doonaa xaaladda gaarka ee qofka qaxootiga ah.

Sida hoos ku qoran, waxaa muhiim ah in fiiro gaar loo yeesho in deganaansha la siiyo dadka qaxootiga ahi kala duwan yihiin:

- Qofka qaxootiga wuxuu haysan karaa aqoonsi qaxootinimo oo rasmi ah (konventionsstatus) waxaana la siiyaa deganaashaha (§7, stk.1) haddii qofku ka soo cararay dhibaato u gaar ah isla markaasna buuxiyo shuruudaha lagu xusay baaqii caalamiga ahaa ee qaxootiga (Geneve Convention) sida qofka lagu dhibaataynayo afkaartiisa siyaadeed ama diimeed.
- Qofka qaxootiga ah wuxuu haysan karaa magangelyo waxaana la siiyaa deganaanshaha (§7, stk. 2), haddii qofka ka soo cararay dhibaato gaar ah ama ka soo qaxay dagaal sokeeye dartiis.
- Qofka qaxootiga ah wuxuu haysan karaa magangelyo ku meelgaar ah, waxaana la siiyaa deganaanshaha (§7, stk. 3. deganaanshahan waxaa la siiyey dadkii qaxootinimada soo dalbaday wixii ka dambeeyey 13-kii nofeember 2014 ee ka soo qaxay dalalkoodii dagaal sokeeye awgiis.

Dadka sida rasmiga ah loogu aqoonsaday qooxitinamada (konventionsstatus ama § 7, stk.1) waxaa ilaaliya baaqii caalamiga ahaa ee qaxootiga (flygtningekonvention/Geneve Convention). Dadka sida rasmiga ah loogu aqoonsaday qaxootinimada si fudud loogalama noqon karo deganaanshaha ama looguma diidi karo cusboonaysiinta. Marka deganaanshaha lagala noqanayo dadka sida rasmiga loogu aqoonsaday qaxootinimada , waxaa loo baahan yahay in dalkoodii hooyo noqdo nabad iyo inay ka dhacaan isbedelo waawayn oo rasmi ah.

Qaxootiga isbedeladu sida gaarka u taabanayaan ee dowladu sharciyadooda isha ku hayn doonto waxay yihiin:

- qaxootiga haysta deganaanshaha magan-gelyada (§7, stk. 2) ama magan-gelyada ku-meel-gaarka ah (§7, stk. 3). Iabada deganaansho waxaa la siiyaa qaxootiga ka soo qaxa dagaalada sokeeye ee ka jira dalalkooda, isla markaasna ka soo jeeda degaananada ay waqtigan dowladda Denmark u aragto in xaaladda nabad gelyadu soo hagaagtay.
- Waxay sidoo kale waxaa sharcigan cusubi saamaynayaa qaxootiga haysta deganaanshaha (§ 7, stk. 2) ee dalkoodii uga soo qaxay dhibaato shakhsi ah ama gaar ah, haddii dhibaatadaas shakhsiga ahayd ee qofku ka soo qaxay meesha ka baxdo.

Qaxootiga haysta deganaanshaha kor ku xusan waxay dareemi doonaan in dowladda daanishku si aad ah dib u eegis ugu samayn doonto kiisaskooda (dacwadahooda), isla markaasna ka fiirsan doonto inaan deganaanshaha loo cusboonaysiin ama lagala noqdo.

Sharcigan cusub mas'uuliyiinta daanishka ku qasbi maayo inay eegaan xiriirka qofka qaxootiga ahi la leeyahay Denmark marka qiimaynta lagu samaynayo in loo cusboonaysiiyo deganaanshaha iyo kale. Laakiin marka la gaarayo go'aan kasta oo la xiriira deganaansho kala noqosho iyo diidmo cusboonaysiin waxaa la eegayaa inay ka hor imanayso heshiisyada caalamiga ee dowladda daanishku saxiixday iyo in kale. Taas oo macnaheedu yahay in luqadda, shaqada, waxbarashada, qoyska iyo xiriirka qofku Denmark la leeyahay ay weli door muhiima ka qaadan karaan fursadda in qofku sii deganaado dalka. Sidoo kale arimahani waxay muhiim u yihiin in qofku helo deganaanshaha abadiyanka ah iyo jinsiyadda daanishka. Sidaas darteed way wanaagsantahay in qofku barto luqadda daanishka, shaqaysto, wax barto iyo in qofku si mutadawacnimo ah ugu shaqeeyo bulshada uu ku noolyahay xatta haddii qofku haysto deganaansha ku-meel-gaarka ah ee (§ 7, stk. 3).

## Haddii qofka loogu yeero waraysi ku saabsan deganaansho dheerayn ama deganaansho la noqosho.

Marka mas'uuliyiinta daanishku ka arinsanayaan in qofka loo diido cusboonaysiinta deganaanshaha ama in laga qaado deganaanshaha, laanta dowladda u qaabilsan ajaanibta (Udlændingestyrelsen) ee fadhigeedu yahay xerada Sandholm ayaa qofka ugu yeerta waraysi.

In qofku yimaado waqtiga balanta, soona qaato dokumentiyada looga baahanyahay ee ku qoran warqada ay soo dirtay laanta ajaanibku waxayna muhiim u tahay dacwda qofka. Haddii ay qofka duruuftu u saamixi waydo inuu yimaado waqtiga balanta qofku wuxuu codsan karaa in waraysiga loogu bedelo waqti kale. Waraysigu wuxuu qaadan karaa maalin dhan. Qofka waxaa loo qaban turjumaan.

Inta uu waraysiga socdo waxaa qofka la waydiinayaa sababta keentay in qofku markiisii horeba ka soo qaxo dalkiisa hooyo iyo in ay jiraan sababo kale oo qofku ka walaacsan



yahay ama ka cabsanayo hadduu dib ugu noqon lahaa dalkiisii hooyo. Waa in qofku xoogga saaro waxyaalaha (xaalka) gaarka u ah qofka iyo qoyskiisa. Waa muhiim in qofku sheego haddii ay jirto dhibaato qofku si gaar ah uga cabsanayo inay ku dhacdo cauurtiisa haddii ay dalkoodii ku laabtaan.

Sidoo kale waxaa qofka wax laga waydiinayaa xiriirka uu la leeyahay Denmark sida in qofku ku hadlo luqadda daanishka, inuu shaqaysto ama inuu dad asxaab ah iyo reer ku leeyahay dalka. Waxaa sidoo kale qofka la waydiinayaa xaladiisa caafimaad.

Hadduu qofku haystay deganaansho qaxootinimo isla markaasna loo diido in loo cusboonaysiiyo ama deganaanshaha lagala noqdo, waxaa dacwada qofka si toos ah loogu gudbinayaa guddiga ama maxkamadda qaxootiga (Flygningenævnet) oo qiimayn ku samaynta doonta go'aanka ay laanta ajaanibtu (udlændingestyrelsen) qofka ugu diiday cusboonaysiinta ama kaga qaaday deganaanshaha. Marka qofka dacwadiisu ku wareego guddiga qaxootiga waxaa qofka loo qabanayaa qareen ama looyar dacwada ka caawiya dacwadiisa.

Haddii qofka qaxootiga lagala noqdo deganaanshihiisa waxaa sidoo kale deganaanshahooda waayi doona qoyska uu qofku dalka keenay. Sidaas darteed haddii qoyska dalka la keenay lagala noqdo deganaansha, waa inay sida ugu dhaqasaha badan dacwadooda u gudbiyaan guddiga qaaxootiga (Flygtningenævnet). Qoyska ama qofka dalka la keenay ee deganaanshaha lagala noqday waa inay dacwadooda 7 beri gudaheeda ugu soo gudbiyaan guddiga qaxootiga si ay si sharci dalka u sii joogaan inta dacwadooda laga gaarayo go'aanka ugu dambeeya. Qoyska ama qofka dalka la keenay loo qaban maayo qareen ama looyar ka caawiya dacwadda.

## Dib u noqosho (ku laabasho dalkii hooyo)

Waqti dheer waxaa suurtagal ahayd in la siiyo caawinaad dhaqaale qofkii iskiis ugu laabanaya dalkiisii hooyo. Qofka waxaa laga caawinayaa kharajka safarka, daawada iyo caymis la xiriira caafimaadka, kharajka iskuulka ilmaha iyo weliba caawinaad dhaqaale oo loogu talo galay in qofku mar labaad nolol kaga abuurto dalkiisa hooyo. Isbedaladan ugu dambeeyey ee lagu sameeyey xeerka ajaajibta (udlændingeloven) ayaa sidoo kale ka dhigan inay caawinaad dhaqaale heli karaan si ay ugu laabtaan dalalkoodii hooyo qaxootiga iyo dadka lagu keenay habka isku-keenida qoysaska (familiesammenføring) ee ka soo jeeda, wadamada dagaalo sokeeye awgood, qaxootigooda oo dhan la siiyo deganaanshaha marka ay magan gelyada ka dalbadaan Denmark sida tusaale ahaan dalka Suuriya. Qaxootiga doonaya inay dib ugu noqdaan wadamadoodii kana yimi dalalka noocan oo kale ah si ay u helaan caawinaad dhaqaale waa inay deganaansho haysteen ugu yaraan muddo hal sano ah.

Caawinaada dhaqaale waxaa heli kara qaxootiga si iskood ugu noqonaya wadankii iyo qaxootiga loo diido cusboonaysiinta deganaanshaha ama lagala noqdo. Haddii qofka loo diido cusboonaysiinta deganaanshaha ama lagala noqdo deganaanshaha, waa muhiim in qofku soo codsado caawinaada dhaqaale ee la siiyo qofka dalkiisii ku laabanaya, inta aanay dhammaan waqtigii loo qabtay in qofku kaga baxo Denmark. Sidoo

kale dadka lagu keenay habka isku keenista qoyska (familiesammenføring) waxay heli karaan caawinaad dhaqaale laakiin waqtiga laga doonayo inay ku soo codsadaan caawinaada dhaqaale way ka yartahay tan qofka aan dalka la keenin, waxayna ku xirantahay in qofku/qoysku markii deganaanshaha lagala noqday si dhaqso ah dacwadooda ugu gudbiyey Guddiga Qaxootiga (Flygtningenævnet).

Sharcigan wuxuu sidoo kommuunayaasha siinayaa fursad wanaagsan oo ay kaga caawiyaan siday dadka qaxootiga ahi ugu diyaargaroobi lahaayeen guryo noqoshadooda. Kommuunayaashu waxay qaxootiga siiyaan koorasyo ama waxbarasho gaaban oo u fududayn doonta in qaxootigu shaqo helaan markay ku laabtaan dalalkoodii.

## Is dhexgalka (Integration)

Waxba lagama bedelin xuquuquhii aasaasiga ahaa ee barnaamijka is dhexgalka. Qaxootiga iyo dadka lagu keenay habka isku-keenista qoyska waxay weli xaq u leeyihiin iskuul, waxbarasho, shaqo, caafimaad iyo caawinaada dowladda. Qaxootiga haysta deganaanshaha ku meelgaarka ah (§7, stk. 3) xaq uma leh in la siiyo waxbarasho jaamacadeed oo lacag la'aan ah. Qaxootiga haysta deganaanshaha (§7, stk. 1 iyo §7, stk. 2) weli waa loo ogolyahay inay helaan waxbarasho jaamaceed oo bilaash ah.

Sharcigan cusub wuxuu kommuunayaasha waajib kaga dhigayaa inay qaxootiga siiyaan guryo ku meelgaar ah keliya.

Sharciga cusub wuxuu sidoo kale ka mid ah in la yareeyey lacagta caydha ah (integrationsydelsen) ee la siiyo qaxootiga caruurta leh. Caydha waxaa la yaraynayaa marka qofku dalka joogo 3 sano, oo ah marka waalid caruurta leh ay xaq u yeeshaan 50% lacagta waalidka lagu siiyo caruurta iyo dhalinyarada la nool waalidka. Dhaqaale dhimistani waxay dhaqan gelaysaa 1da janaayo ee sanadka 2020.

Marka la gaaro 1.1.2020 waxaa magacii loo aqoon jiray lacagta caydha ah (integrationsydelsen) loo bedelayaa "Caawinaada is masruufka iyo dal ku noqoshada" (Selvforsørgelses- og hjemrejseydelsen).

1da luulyo ee sanadkan 2019 waxaa is bedeli doona magacii loo aqoon jiray barnaamijka is dhex-galka (integrationsprogrammet), hadda wixii ka dambeeyana noqon doona Barnaamijka Is-Masruufka iyo Dal ku Noqoshada .

## Macluumaad iyo la talin

waxaa jira warar been abuur ah oo laga faafiyey sharcigan cusub. Warka laga faafiyey sharcigan ayaa abuurtay jaah wareer iyo walaac. Qaxootiga uu sharcigan cusub sida aadka ah u taabanayo waa qaxootiga ay taabanayso dhaqaale dhimistu iyo qaxootiga haysta deganaanshaha § 7, stk. 2 iyo § 7, stk. 3 iyo qoysaska loo keenay. Qaxootiga la siiyo labadan deganaansho waa dadka ka soo qaxa dalalka ay jiraan dagaalada sokeeye iyo xasilooni daro guud.



Waxaan ku talinaynaa in qofku ogaado nooca deganaansho ee uu haysto iyo xuquuqaha la socda deganaanshaha. Waxaan dadka ku boorinaynaa inaysan iska cabsan sabab la'aan ee waa in qofku yeeshaa aragti mustaqbal oo sii wataa noloshiisa. Muhiim maahan in qofka mustaqbalkiisa nololeed noqon doono Denmark ama dalkiisii hooyo.

Haddii aad qabtid shaki ama su'aal waa muhiim inaad heshid talo iyo tilmaamid.

## Adeegga hay'adda ay bixiso Dansk Flygtningehjælp

**La talin iyo Macluumaad la xiriirta arimaha magangelyada**
La talin la xiriirta dhammaan qaybaha kala duwan ee magangelyada sida codsiga magangelyada, diidmada kama dambaysta ah, deganaansho kala noqoshada iyo gurya-noqoshada (ku laabashada dalkii hooyo).

Dansk Flygtningehjælp
Borgergade 6, 1300 København K
Tlf. 3373 5000 (maalin walba. Saacadda: 9:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo)
Maalmaha qaarkood waxaa jooga turjumaan inta u dhexaysa 10:00 subaxnimo iyo 12:00 duhurnimo.

Arbaco walba waxaa jirta la talin furan inta u dhexaysa 10:00 subaxnimo iyo 1:00 duhurnimo. Dhammaan dadka magangelya doonka ah iyo qaxootiga lagala noqday deganaanshaha ama loo diiday cusboonaysiinta sharciyada ee qaba su'aalo la xiriira arimahan way iman karaan xafiiska hay'adda Dansk Flygtningehjælp. Waxaad goobta la talin u iman kartaa adigoo aan qabsan wax balan ah. Goobta la talin ma joogo turmaan ku caawin doona haddii aadan ku hadlin daanishka.

**Dib u noqosho**
Qaxootiga iyo ajaanibta kale ee ku fekeraya inay iskood ugu noqdaan dalalkoodii hooyo ama dalalkii ay deganaan jireen waxay la talin iyo faah-faahin ka heli karaan halkan hoose: https://flygtning.dk/danmark/om-at-vende-hjem
E-mail: atvendehjem@drc.ngo & tlf. 3373 5000

**Talo caawimo ah (frivilligrådgivningen)**
Su'aalaha la xiriira isku keenista qoyska, deganaanshaha abadiyanka, jinsiyadda/dhalashada daanishka, xeerka is dhexgalka iyo xeerka arimaha bulshada (sociallovgivning) waxaa si bilaash ah kaaga jawaabi doona, talona kaa siin doonaa dad aqoon u leh sharciyada, arrimaha bulshada iyo aqoonyahanno kale.

Halkan ka eeg faahfaahinta, ciwaanada iyo waqtiyada la heli karo:
https://flygtning.dk/frivillig/vores-arbejde/frivilligraadgivningen

**An electronic version of this leaflet is also available at:**
**https://www.udsatteflygtninge.dk/materialer.html**

DANSK FLYGTNINGE HJÆLP

**DANSK FLYGTNINGEHJÆLP**
Borgergade 10, 3.sal
1300 København K

Telefon +45 3373 5000
www.flygtning.dk
drc@drc.org